# Deeq Waxbarasho Hore – Codsiga Wadada I

Waxaad codsan kartaa Deeq Waxbarasho Hore – Wadada I oo khadka tooska ah ku saabsan! Booqo earlylearningscholarshipshub.mn.gov si aad uga codsato khadka tooska ah. Ogsoonow: Haddii ilmahaagu ku jiro daryeelka korinta, shaqaalahaaga kiisaska daryeelka korinta waa inuu ka codsadaa khadka tooska ah. Waayeelka daryeelka ma codsan karaan deeqda naftooda.

## Tilmaamaha

### Waa maxay Deeqda Waxbarasho Hore?

Deeq Waxbarasho Hore – Wadada I waxay kaa caawin kartaa ilmahaaga inuu ka qaybgalo daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore ee tayada sare leh si loo hubiyo in ilmahaagu u diyaar yahay inuu guuleysto marka uu gelayo xanaanada. Lacagta deeqda waxaa si toos ah loogu shubi doonaa barnaamijka aad doorato ee ka qayb qaadanaya Parent Aware. Parent Aware waa qalab qiimeyn ah oo ka caawiya waalidiinta inay doortaan barnaamijyo waxbarasho hore oo tayadoodu sarreyso. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo bogga Parent Aware (ParentAware.org).

Ogsoonow: Carruurtu waxay heli karaan hal deeq oo keliya inta u dhexeysa Luulyo 1 iyo Juun 30 sannad kasta, mana heli karaan deeqda Wadada I iyo Wadada II isku mar.

### Xaggee ilmahaygu uu ku isticmaali karaa deeqda??

Waxaad isticmaali kartaa Deeq Waxbarasho Hore – Wadada I ee barnaamij kasta oo daryeelka carruurta oo ka qayb qaadanaya Parent Aware ee Minnesota oo ilmahaagu si joogto ah ugu xiran yahay.

Ilmahaagu uma baahna inuu diiwaan gashan yahay ama ka qayb qaato barnaamijka markaad codsaneyso Deeq Waxbarasho Hore. Si aad u hesho barnaamijka u qalma fadlan la xiriir Khadka Macluumaadka Daryeelka Carruurta ee Minnesota (888-291-9811) ama booqo bogga Parent Aware (ParentAware.org). Waxaad isticmaali kartaa isla kheyraadkan haddii ilmahaagu hadda ka qayb qaadanayo barnaamij laakiin aad rabto inaad sahmiso doorashooyin kale. Hubi inaad u sheegto Maamulaha Aagga doorashadaada barnaamijka haddii lagu siiyo deeq.

### Waa maxay xadiga ugu badan ee abaalmarinta deeqda?

Xadiga ugu badan ee abaalmarinta deeqda la heli karo waxay ku xiran tahay da’da ilmahaaga, gobolka, nooca barnaamijka, iyo heerka Parent Aware. Wax dheeraad ah ka baro xadiga ugu badan ee abaalmarinta deeqda oo gal bogga Deeqaha Waxbarashada Hore: https://education.mn.gov/MDE/fam/elsprog/elschol/

### Waa maxay shuruudaha u-qalmitaanka?

1. **Da’da:** Carruurta dhalan illaa 4 sano jir waxay u qalmaan, iyo 5 sano jir ayaa u qalma haddii ay gaareen 5 sano ka dib Sebtembar 1 ee sannad dugsiyeedka hadda socda. (Carruurtu waxay ka bixi doonaan u-qalmitaanka haddii ay gaaraan 5 sano Sebtembar 1 ama ay diiwaan gashan yihiin oo ka qayb qaadanayaan xanaanada, midkoodna waa kii hore.)
2. **Cinwaanka:** Ilmaha wuxuu ku nool yahay Minnesota (waxay leeyihiin cinwaan Minnesota ah.)

3. **Dakhliga:** Qoyska wuxuu leeyahay dakhli reerka oo u dhiganta ama ka yar 47 boqolkiiba Dakhli Dhexe ee Gobolka ama wuxuu helayaa caawimaad ka timid barnaamij goboleed ama federaal ah oo la oggolaaday.

**Dakhliga Reerka:** Waa inuu ahaadaa ama ka hooseeyaa xadka ku jira jaantuskan. Jaantuskan waxaa saldhig u ah Dakhli Dhexe ee Gobolka waana ansax loogu talagalay abaalmarinta laga bilaabo 14 Oktoobar, 2024 illaa Oktoobar 2025. Jaantuskan waxaa la cusboonaysiin doonaa Oktoobar 2025.

| Tirada qooska | Dakhliga Sanadlaha ah Canshuuraha Kahor | Qooyska inat uu ka koobmo | Dakhliga Sanadlaha ah Canshuuraha Kahor |
|---|---|---|---|
| 2 | $44,006 | 8 | $89,306 |
| 3 | $54,360 | 9 | $91,247 |
| 4 | $64,714 | 10 | $93,189 |
| 5 | $75,068 | 11 | $95,130 |
| 6 | $85,423 | 12 | $97,071 |
| 7 | $87,365 | 13 | $99,013 |

## Mudnaanta Dadweynaha

Carruurtu waxay mudnaan u helaan deeqaha Waxbarashada Hore haddii ay la kulmaan mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha soo socda. Qoysaska sidoo kale waa inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga si ay ugu qalmaan, ilaa aan lagu xusin hoose.

- Ku jirta daryeelka korinta ama waxay leeyihiin waalid/ilaaliye oo ku jira daryeelka korinta ilaa da’da 21 (ma loo baahna dukumentiga dakhliga).
- Waxaa loo gudbiyay in ay u baahan yihiin adeegyada ilaalinta carruurta (ma loo baahna dukumentiga dakhliga).
- Waxaa leh waalid ka yar da'da 21 oo raadinaya shahaadada dugsiga sare ama GED.
- Waxaa la kulmay hoy la’aan 24kii bilood ee la soo dhaafay.
- Waxaa leh waalid hadda ku jira xabsi, jeel, xarunta xabsiga ama kor joogteyn firfircoon.
- Ku jira ama waxay leeyihiin waalid hadda ku jira barnaamijka daaweynta isticmaalka maandooriyaha.
- Ku jira ama waxay leeyihiin waalid hadda ku jira barnaamijka daaweynta caafimaadka maskaxda.
- Waxaa la kulmay rabshadaha guri dhexdiisa ah.
- Hadda waxay leeyihiin barnaamij waxbarasho oo gaar ah (IEP, da'da 3 ilaa 5) ama qorshe adeeg qoys (IFSP, dhalashada ilaa 3).

## Sideen u codsan karaa Deeq Waxbarasho Hore?

1. Buuxi codsiga oo isticmaal midabka buluug/madow ama koronto ahaan. Macluumaadka loo baahan yahay waxaa lagu calaamadeeyay xiddig (*).
    - Haddii ilmahaagu ku jiro daryeelka korinta, wakaaladda adeegyada bulshada ee gobolka ama qabiilka waa inay buuxisaa oo saxeexdaa codsiga. Waayeelka daryeelka ma codsan karaan deeqda si toos ah.
2. Ku lifaaq dukumentiyada loo baahan yahay si aad u caddeyso u-qalmitaankaaga. Eeg Bogga 6 shuruudaha Doorashada 1 (caddeyn ka qaybgalka barnaamijka maaliyadeed ee dadweynaha) ama Bogga 7 shuruudaha Doorashada 2 (caddeyn dakhli).

- Haddii aad codsaneyso "u-qalmitaanka waalid ka yar 21," waalidka codsanaya waa inuu bixiyo caddeyn qoraal ah oo ku saabsan raadinta shahaadada dugsiga sare ama GED® ee ku yaal madaxa hay'adda waxbarashada ee bixiya koorsada(ha) waxbarashada ee waalidku ka qaybgalo.

3. Akhri Heshiiska U Hoggaansanaanta Shuruudaha iyo Digniinta Tennessen.
4. Saxiix oo taariikhda codsiga isticmaal midabka buluug/madow ama saxiixa koronto.
5. Gudbi codsigaaga asalka ah ee Maamulaha Aagga adiga oo raacaya tilmaamaha ku qoran hoosta Liiska Hubinta Codsiga ee bogga xiga.

Codsigan waxaa abuuray barnaamijka deeqaha waxbarashada hore ee Gobolka Minnesota waana inaan wax laga bedelin ama la hagaajin. Lacagta waxaa bixiya Gobolka si loo taageero maamulka deeqaha waxbarashada hore sida ku cad Xeerka Minnesota qaybta 124D.165.

# Liiska Hubinta Codsiga

**Hubi liiska hoose si aad u xaqiijiso inaad haysato wax kasta oo aad u baahan tahay codsigaaga:**

- Buuxi dhammaan aagagga looga baahan yahay codsiga. Qodobada lagu calaamadeeyay xiddig (*) ayaa loo baahan yahay. Dhammaan macluumaadka kale waa ikhtiyaari.
- Buuxi foomkan oo isticmaal midabka buluug/madow ama koronto ahaan.
- Si taxaddar leh u akhri **qodob kasta oo ka mid ah qaybta Heshiiska U Hoggaansanaanta Shuruudaha** iyo **Digniinta Tennessen.**
- Saxiix oo taariikhda codsiga isticmaal midabka buluug/madow ama koronto ahaan.
    - Ikhtiyaari: Akhri heshiiska ka qaybgalka qiimeynta oo bilow inaad siiso oggolaansho.
- Isku dheji dhammaan dukumentiyada taageeraya gadaasha codsiga. Dukumentiyada taageeraya waxaa ka mid ah:
    - Doorashada 1: Dukumentiga muujinaya ka qaybgalka hadda ee mid ka mid ah barnaamijyada dadweynaha ee la oggolaaday ee ku qoran Bogga 6.
    - Doorashada 2: Dukumentiga dakhli marka lagu daro Doorashada 2: Shaxda Dadka Waaweyn ee Qoyska iyo Dakhliga ay ku leeyihiin Bogga 7 ee codsiga.
        - Haddii mid ka mid ah xubnaha dadka waaweyn ee qoyskaaga aanu lahayn wax dakhli ah, waa in la buuxiyaa foomka Caddeynta Ma Jiro Dakhli ee Qoyska ee Bogga 8 oo uu mid ka mid ah dadka waaweyn soo gudbiyaa codsigaaga.
    - Haddii aad tahay waalid dhalinyaro ah oo ka yar 21 oo raadinaya shahaadada dugsiga sare ama GED®, waa inaad bixisaa caddeyn qoraal ah oo ku saabsan raadinta shahaadada dugsiga sare ama GED® ee ku yaal madaxa hay'adda waxbarashada ee bixiya koorsada(ha) waxbarashada ee waalidku ka qaybgalo.
- Gudbi codsiga la buuxiyay oo saxiixan oo ku lifaaq dukumentiyada u-qalmitaanka ee Maamulaha Aagga ku qoran hoos.
- Heyso ugu yaraan hal koobi oo codsiga iyo lifaaqyadaada si aad .

# Gudbi Codsiga

Gudbi codsigaaga la buuxiyay iyo dukumentiyada u-qalmitaanka ee Maamulaha Aaggaaga:

think small
LEADERS IN EARLY LEARNING

Think Small
ATTN: Early Learning Scholarships
10 Yorkton Court
Saint Paul, MN 55117
Email: ApplyELS@thinksmall.org
Phone: 651-641-6604

Maamulaha Aagga ayaa kuu soo diri doona warqad si uu kuu ogeysiiyo xaaladda deeqda waxbarashada hore ee ilmahaaga ama carruurtaada. Haddii aad qabto su'aalo, la xiriir Maamulaha Aagga..

*Dukumenti la'aanta ah sida caddeynta ka qaybgalka barnaamijka ama dakhliga ama saxiixyada maqan waxay keeni karaan dib u dhac*

*This page is intentionally left blank.*

MINNESOTA

**Box is for Administrator Use Only:**
Program Name:___________________________
Award Start Date:_________________________
Award Amount:___________________________
Application Fiscal Year:___________________
Notes: _________________________________

# Codsiga Deeqda Waxbarashada Hore – Wadada I

Fadlan Buuxi Foomkan oo Isticmaal Midabka Buluuga/Madowga ama elektartonig ahaan Macluumaadka lagu calaamadeeyay xiddig (*) waa inuu buuxiyo waalidka/ilaaliyaha. Haddii su'aalaha loo baahan yahay ay bannaan yihiin, waalidka/ilaaliyaha waa inuu saxaa codsiga. Haddii ilmahaagu ku jiro daryeelka korinta, shaqaalahaaga kiisaska daryeelka korinta waa inuu ka codsadaa khadka tooska ah. Waayeelka daryeelka ma codsan karaan deeqda naftooda

.

## Macluumaadka Ilmaha

Provide information for all children you want considered for a scholarship. Use separate applications for children living at different addresses. Siblings are children who share one or both parents through blood, marriage or adoption, including siblings as defined by the children's tribal code or custom.

**Note**: Children age 5 or older on September 1 of the current fiscal year are not eligible to receive a scholarship.

### Ilmaha Koowaad

*Magaca ilmaha: ______________________________________________________________
*Kowaad* *dhexda* *Ugudanbeeya*

*Taariikhda Dhalashada Ilmaha: ___________________________
*MM/DD/YYYY*

*Jinsiga Ilmaha (*check one*): _ Rag _ Dumar

Ilamaha ma kuwa lahayaa?: _ Haa _ Maya

Udhalashada (*check one*): _ Hispanic/Latino _ Not Hispanic/Latino

Jinsiga (*Xariiq dhamaan kuwa ku quseeya*): ____________ American Indian or Alaskan Native _______ Asian
________________ Black or African American ______________ Pacific Islander or Native Hawaiian _______ White

Ilmahani ma helay barista caruurta yaryar? _ haa _ Maya

*Haddii ay Haa taahy:* Goobtee: __________________________ Taariikhda (*MM/YYYY*):___

Magaca barnaamijka carruurnimada hore ee aad qorsheyneyso inaad isticmaasho deeqda, haddii la siiyo. Qor "lama oga" haddii aan la dooran barnaamij weli..______________________________ Telefoonka: ________________________

Ilmahaaga hadda maka qeyb qaataa Barnaamijkan? _ Haa _ Maya

Haddii aad kaliya codsanayso hal ilmo, ka bood boggan.

Haddii aad codsanayso in ka badan saddex carruur ah, sawir boggan oo ku lifaaq waraaqaha dheeraadka ah codsigaaga..

## Imaha Labaad

*Magaca ilmaha: ______________________________________________________________________

*Kowaad* *dhexda* *Ugudanbeeya*

*Taariikhda Dhalashada Ilmaha: _________________________

*MM/DD/YYYY*

*Jinsiga Ilmaha (*Dooro mid*): _ Rag _ Dumar

Ilamaha ma kuwa lahayaa?: _ Haa _ Maya

Udhalashada (*Dooro mid*): _ Hispanic/Latino _ Ma aha Hispanic/Latino

Jinsiga (*Xariiq dhamaan kuwa ku quseeya*): ___________ American Indian ama Alaskan Native _______ Asian
_______________ Black ama African American ___________ Pacific Islander ama Native Hawaiian _______ White

Ilmahani ma helay barista caruurta yaryar? _ haa _ Maya

*Haddii ay Haa taahy:* Goobtee: _________________________ Taariikhda (*MM/YYYY*):___

Magaca barnaamijka carruurnimada hore ee aad qorsheyneyso inaad isticmaasho deeqda, haddii la siiyo. Qor “lama oga” haddii aan la dooran barnaamij weli..____________________________ Telefoonka: ______________________

Ilmahaaga hadda maka qeyb qaataa Barnaamijkan? _______ Haa _ Maya

## Ilmaha Seddexaad

*Magaca ilmaha: ______________________________________________________________________

*Kowaad* *dhexda* *Ugudanbeeya*

*Taariikhda Dhalashada Ilmaha: _________________________

*MM/DD/YYYY*

*Jinsiga Ilmaha (mid dooro): _ Rag _ Dumar

Ilamaha ma kuwa lahayaa?: _ Haa _ Maya

Udhalashada (*mid dooro*): _ Hispanic/Latino _ Not Hispanic/Latino

Jinsiga (*Xariiq dhamaan kuwa ku quseeya*): ___________ American Indian ama Alaskan Native _______ Asian
_______________ Black ama African American ___________ Pacific Islander ama Native Hawaiian _______ White

Ilmahani ma helay barista caruurta yaryar? _ haa _ Maya

*Haddii ay Haa tahay:* Goobtee: _________________________ Taariikhda (*MM/YYYY*):___

Magaca barnaamijka carruurnimada hore ee aad qorsheyneyso inaad isticmaasho deeqda, haddii la siiyo. Qor “lama oga” haddii aan la dooran barnaamij weli..____________________________ Telefoonka: ______________________

Ilmahaaga hadda maka qeyb qaataa Barnaamijkan? _______ Haa _ Maya

## Macluumaadka Waalidka/Ilaaliyaha Sharciyaysan

**Waalidka ama ilaaliyaha sharciga ee carruurta lagu soo daray codsigan waa inuu buuxiyaa qaybtaan.**

*Magaca Sharci ee Waalidka/Ilaaliyah: ___________________________________________________________________

*Magaca Hore* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Cinwaankaga Degaanka(Degmada Cinwaankaaga): _____________ Nambarka Dabaqa #:_________________

*Magalada:______________* Gobolka:______________*koodhka boostada:___________Degmada:________

*Xiriirka ilmaha: Waalidka Ilaaliye Sharci (maxkamadu u magacowday)

Kale: ____________________________________________________________________

Lambarka Taleefanka: __________________ Cinwaanka Iimeylka: _______________________

Ma ogoshahay in Maamulaha Deegaanka kuu soo diro farriimaha qoraalka ah? Waxaa laga yaabaa in lacag la iska qaado

Fariin dirka ama isticmaalka data. Haa___ Maya_____

Cinwaanka Boostada (Haddii uu ka duwan yahay cinwaanka degganaanshaha):

Magalada:________________ Gobolka:__________ koodhka boostada:____________ Degmada:_____________

### Xiriir Dheeraad ah 1

Haddii uu jiro qof kale sida waalid/ilaaliye sharci kale, xubin qoys dheeraad ah, shaqaale kiis, shaqaalaha barnaamijka, turjubaan, ama qof weyn oo kale oo aad rabto inaad ku darto codsigaaga, halkan ku qor. Haddii ay jiraan laba waalid/ilaaliye sharci, waalidka/ilaaliyaha sharciga ee labaad waa in halkan lagu qoraa. Markaad qofkan ku qorto, waxaad ogolaataa in Maamulaha Deegaanka uu la xiriiri karo qofkan si uu ugala hadlo macluumaadka ku jira foomkan.

Magaca:_____________________________________________________________________________________

*Magaca Hore* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

Cinwaanka Degaanka:__________________ Nambarka Dabaqa #:________________

Magalada:________________ Gobolka:___________koodhka boostada:_________Degmada:___________

Lambarka Taleefanka:__________________ Cinwaanka Iimeylka:_____________________

Ma ogoshahay in Maamulaha Deegaanka kuu soo diro farriimaha qoraalka ah? Waxaa laga yaabaa in lacag la iska qaado

Fariin dirka ama isticmaalka data. Haa___ Maya_____

Xiriirka ilmaha/ilmaha:

### Xiriir Dheeraad ah 2

La dooro karo: Haddii uu jiro qof kale sida xubin qoys dheeraad ah, shaqaale kiis, shaqaalaha barnaamijka, turjubaan, ama qof weyn oo kale oo aad rabto inaad ku darto codsigaaga, halkan ku qor. Markaad qofkan ku qorto, waxaad ogolaataa in Maamulaha Deegaanka uu la xiriiri karo qofkan si uu ugala hadlo macluumaadka ku jira foomkan.

Magaca:_____________________________________________________________________________________

*Magaca Hore* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

Cinwaanka Degaanka:__________________ Nambarka Dabaqa #:________________

Magalada:________________ Gobolka:___________koodhka boostada:_________Degmada:___________

Lambarka Taleefanka:__________________ Cinwaanka Iimeylka:_____________________

Ma ogoshahay in Maamulaha Deegaanka kuu soo diro farriimaha qoraalka ah? Waxaa laga yaabaa in lacag la iska qaado

Fariin dirka ama isticmaalka data. Haa___ Maya_____

Xiriirka ilmaha/ilmaha:

# Macluumaadka Waalidka/Ilaaliyaha Sharciyaysan

**Waa maxay heerka ugu sarreeya ee waxbarashada aad dhammeeysay?** *Kuwan so socda mid dooro.*

_ Ka yar shahaadada dugsiga sare __ Shahaadada dugsiga sare ama u dhiganta (tusaale, GED) ________ Wax ka bartay in yaro jaamacad

_ shahaadada laba sano ee jaamacadda __ Shahaadada koowaad ee jaamacadda ____ Shahaadada jaamacadeed ee sare

**Waa maxay xaaladda shaqo ee aad hadda haysato?** *Kuwan so socda mid dooro.*

_ Shaqo buuxda (25 saacadood/toddobaadkiiba ama ka badan) ___ Shaqo qayb ah (ka yar 25 saacadood/toddobaadkiiba)

_ Shaqo la'aan, shaqo raadinaya ___ Shaqo la'aan, aan shaqo raadin

Macluumaadka soo socda ayaa la weydiinayaa sababtoo ah xaaladaha qaarkood waxay mudnaanta siin karaan ilmahaaga deeq waxbarasho hore. La wadaagista macluumaadkan waa ikhtiyaari, waxaana kaliya uu faa'iido u yeelan karaa codsiga ilmahaaga, mana loo isticmaali karo in lagu diido codsiga ilmahaaga. Wixii faahfaahin dheeraad ah, eeg Hagaha Dheeraadka ah ee Dadka Mudnaanta Leh ee ku yaal bogga Deeqaha Waxbarashada Hore: https://education.mn.gov/MDE/fam/elsprog/elschol/

**Ma tahay waalid dhallinyaro ah oo ka yar 21 sanno oo raadinaya shahaadada dugsiga sare ama GED?** ___Haa ___Maya

Haddii ay haa tahay, Taariikhda Dhalashada (MM/DD/YYYY): ______________

*Oo ku lifaaq caddaynta qoraal ah ee raadintaada shahaadada dugsiga sare ama GED® oo ku qoran warqadda hay'adda waxbarashada.*

**Ma jiro waalid, daryeele aasaasi ah, ilaaliye sharci, iyo/ama ilmaha wax ka mid ah xaaladahan soo socda?** Midka kugu habboon sax.

__Hadda ku jira xabsi, xabsiga dhexe, xarunta xabsiga ama laga warhayo __Hadda ku jira barnaamijka daaweynta isticmaalka maandooriyaha

__Hadda ku jira barnaamijka daaweynta caafimaadka maskaxda __Jirdilka guriga

__Hadda haysta barnaamij waxbarasho oo gaar ah (IEP, da'da 3 ilaa 5) ama qorshe adeeg qoys oo gaar ah (IFSP, da'da dhalashada ilaa 3)

**Qoyskaagu Ma la kulmay mid ka mid ah xaaladaha noolaanshaha soo socda, xilli kasta 24-ka bilood ee la soo dhaafay (oo hadda ku jirto) sababtoo ah dhibaato dhaqaale ama hoy la'aan?** Mid dooro kuwa ku habboon

__Hooy ___Guuritaan badan meel meel ilaa meel ___Si ku-meelgaar ah ula joog qoys kale ama saaxiibo

Hutel, motel, baabuur-guri, ama goobka dalxiiska (sababta hoy la'aan, dhibaato dhaqaale, ama sabab la mid ah)

_ Baabuur, bannaanka, ama meel fagaare ah

**Ilmaha Adeegyada Ilaalinta Carruurta ku jira**_____________________

Haddii ilmahaaga aanu helin adeegyada ilaalinta carruurta, qaybtaan iyadoo banana ka gudub.

Hay'adda Gudbinta:______________________ Daariikhda: _______________________

Magaca Shaqaalaha Gudbinta: ________________________ Jagada shaqada: ___________________

Lambarka Taleefanka:______________ Cinwaanka Iimeylka:______________

**Waalidka ku jira Daryeelka Kalkaalinta Fidiya ee Ilaa Da'da 21**

Haddii aadan ahayn waalid ku jira daryeelka kalkaalinta fidiya, qaybtaan iyadoo banana ka gudub. Haddii ilmuhu ku jiraan daryeelka kalkaalinta, waa in shaqaalahaooda qaabilsan kiiskooda u buuxiyaa codsigan.

Hay'adda Gudbinta:_______________________________________ Daariikhda:___________________________
Magaca Shaqaalaha Gudbinta: ______________________________ Jagada shaqada: ______________________
Lambarka Taleefanka:________________________ Cinwaanka Iimeylka:____________________

# Macluumaadka Qoyska

### Carruurta ku jirta Qoyska *

Ku qor dhammaan xubnaha qoyska oo ah dhallaanka, carruurta, iyo ardayda ilaa iyo fasalka 12, oo ay ku jiraan carruurta lagu xusay codsigan. Eeg bogga 7 ee qeexitaanka qoyska. Ha ku darin dadka waaweyn ee ka weyn fasalka 12 miiskaan. Haddii ay meel dheeraad ah loo baahan yahay magacyada dheeraadka ah, ku lifaaq xaashid kale.

| **Magaca Koowaad ee Ilmaha** Ku qor dhammaan carruurta ku jirta qoyska oo ay ku jiraan carruurta codsanaysa deeqda waxbarasho. | **Magaca Dhexe ee Ilmaha** | **Magaca Dambe ee Ilmaha** | **Taariikhda Dhalashada Ilmaha** |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

**Luuqaddee ayey qoyskaagu inta badan ku hadlaan guriga?** *Mid dooro.*
_ Ingiriisi _Hmong _Soomaali _Isbaanish _Fiyatnaami _ Mid kale

**Ma u baahan tahay turjubaan?** _ Haa ___ Maya

**Xubnaha Qoyskaaga Maka tirsan yihiin Mid Ka Mid Ah 11 Qabiil ee Gobolka Minnesota ee Federaalka aqoonsan Yahay** addii haa, calaamadee dhammaan kuwa ku khuseeya. Haddii maya, ka gudub iyadoo bannaan

_ Bois Forte Band of Chippewa _ Fond Du Lac Band of Lake Superior Chippewa - Grand Portage Band of Lake Superior Chippewa
_ Leech Lake Band of Ojibwe _ Lower Sioux Indian Community _ Mille Lacs Band of Ojibwe
_ Prairie Island Indian Community _ Red Lake Nation _ Shakopee Mdewakanton Sioux Community
_ Upper Sioux Community _ White Earth Nation
_ Kuwa kale: ____________________________________________________________________________

**Sidee Ku Maqashay Deeqaha Waxbarashada Hore?** *Calaamadee dhamaan kuwa ku quseeya.*
_ Barnaamijkeyga _ Saaxiibo? Qoyska _ Qoys kale ee Barnaamijka ku jira
_ Agaasimaha goobta _Lamaanaha bulshada (tusaale, maktabadda __ Baraha Bulshada(Facebook, Twitter)
_ Baadhista khadka tooska ah _ Parent Aware/Child Care Aware _ Adeeg bixiyaha qabiilka, Gobolka, ama Degmada
_ Xayeysiin/warqad _ Mid kale: ________________________________________________

## Caddeynta U-Qalmitaanka Dakhliga

Qoysaska waa inay muujiyaan u-qalmitaanka dakhliga.

## Dalbashada 1aad: Ka Qaybgalka Barnaamijyada Dadweynaha

- Haddii aad kaga jawaabto **haa** mid ama in ka badan su'aalaha 1 illaa 7, **ku lifaaq dukumentiyada mid ka mid ah barnaamijyada dadweynaha** codsigaaga.
- **Caddeyn la aqbali karo ee ka qaybgalka waxaa ka mid ah**: ogeysiis rasmi ah oo ku qoran warqadda barnaamijka; codsi oggolaansho leh/saxiixa barnaamijka (tusaale, codsiga CACFP ama FRPM ee la oggolaaday); foomka oggolaanshaha barnaamijka dadweynaha; biilka hadda ama risiidhka barnaamijka (tusaale, biilka MEC2 ee CCAP); ama shaashad laga soo qaaday nidaamka rasmiga ah ee barnaamijka (tusaale, heerka cuntada lacag la'aanta ah ama qiimaha la dhimay ee ku jira Infinite Campus). Caddeynta ka qaybgalka waa inay yeelataa magaca waalidka/ilaaliyaha iyo/ama ilmaha(yaasha), waa inay taariikheysnaan, waana inay ansax tahay wakhtiga abaalmarinta.
- **Caddeyn aan la aqbali karin waxaa ka mid ah**: warqad sugitaan, codsi aan la oggolaaday, dukumentiyo aan lahayn taariikh, iyo/ama dukumentiyo dhacay.

| **Barnaamijka Dadweynaha**<br>Ku lifaaq caddeyn mid ka mid ah barnaamijyada hoos ku taxan. | **Dooro haa ama Maya** |
|---|---|
| **1.** Ma ilmahaaga ama walaalahiis ka qaybqaataan Barnaamijka **Cuntada Lacag La'aanta ah iyo Qiimaha La Dhimay (FRPM)**?<br>Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada FRPM sida warqadda oggolaanshaha, codsiga la oggolaaday oo leh saxiixa barnaamijka, ama dukumentiyada nidaamka rasmiga ah ee barnaamijkaaga. | Haa Maya |
| **2.** Ma hadda ka qaybqaadataa Barnaamijka **Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP)?**<br>Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada CCAP sida warqadda Go'aanka. | Haa Maya |
| **3.** Ilmahaaga hadda maku ku jiraa **barnaamijka Head Start?**<br>Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada ka qaybgalka Head Start sida warqadda aqbalaadda/oggolaanshaha ee hay'adda Head Start ama foomka diiwaangelinta ee la oggolaaday oo leh saxiixa barnaamijka. | Haa Maya |
| ***4.*** Hadda maka qaybqaadataa Barnaamijka Kaabista Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)?<br>Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada SNAP sida warqad ama bayaanka xaaladda ka socota degmadaada, ama dukumentiyo kale oo degmadaada. Nuqul ka mid ah kaarkaaga EBT waa dukumenti aan la aqbali karin. | Haa Maya |
| ***5.*** Haddaad Maka qaybqaadataa Barnaamijka Maalgashiga Qoyska Minnesota (MFIP)?<br>Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada MFIP sida warqad ama bayaanka xaaladda ka socota degmadaada, ama dukumentiyo kale oo degmadaada. | Haa Maya |
| **6.** Hadda Maka qaybqaadataa Barnaamijka Cuntada Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CACFP)? Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada CACFP ee muujinaya ka qaybgalka ilmahaaga sida warqadda oggolaanshaha ama codsiga la oggolaaday oo leh saxiixa barnaamijka. Ogsoonow: Qoysasku ma u qalmaan deeqaha kaliya ku saleysan u-qalmitaanka goobta bixiyaha CACFP. Qoysaska waa inay u qalmaan iyadoo lagu saleynayo dakhligaaga. | Haa Maya |
| **7.** Hadda ma ka qaybqaadataa Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee Kaymaha Hindiya? Haddii haa, ku lifaaq dukumentiyada Barnaamijka Qaybinta Cuntada sida warqadda oggolaanshaha ama bayaanka xaaladda. | Haa Maya |

Haddii aad kaga jawaabto **haa** mid ama in ka badan su'aalaha 1 illaa 7, ka bood bogagga 7aad iyo 8aad.

Haddii aad kaga jawaabto **maya** su'aalaha 1 illaa 7, waa inaad isticmaashaa **Dalbadashada 2aad** si aad u muujiso dakhligaaga. Buuxi shaxda dadka waaweyn ee qoyska iyo dakhligooda ee bogga xiga oo soo gudbi dukumentiyada dakhliga ee saxda ah si loo hubiyo u-qalmitaanka.

**Buuxi boggan** oo soo gudbi dukumentiyada saxda ah ee dakhliga haddii aadan hadda ka qaybqaadan barnaamij dadweyne oo Ikhtiyaarka 1 ah.
**Ka bood boggan** haddii aad hadda ka qaybqaadato oo aad keeni karto dukumentiyada mid ka mid ah barnaamijyada dadweynaha ee Ikhtiyaarka 1 ee lagu taxay Bogga 6.

## Dalbashada 2aad: U-Qalmitaanka Dakhliga Qoyska

**Tallaabada 1:** Buuxi Shaxda "Dadka Waaweyn ee Qoyska ah iyo Dakhligooda".

- Liis garee dadka waaweyn ee qoyska ku jira (adiga oo ku jira) shaxda.
- Ujeedada barnaamijkan, xubnaha qoyskaaga waa "Qof kasta oo kula nool oo wadaaga dakhli iyo kharashaadka, xitaa haddii aanay qaraabo ahayn."
  - Xubnaha qoyska waxaa ku jira dhammaan dadka ku nool guriga, qaraabo ha ahaadaan ama ha noqotee (sida awoowayaal, qaraabo kale, ama saaxiibo), oo wadaaga dakhli iyo kharashaadka. Qoysaska kuma jiraan dadka kale ee dhaqaale ahaan madax-bannaan, sida qol wadaag.
  - Ku dar ardayda jaamacadda ee si ku meel gaar ah uga maqnaanaya guriga.
  - Ku dar dhammaan dadka waaweyn, xitaa haddii aanay dakhli lahayn.
- Haddii ay helaan dakhli, soo sheeg dakhligooda guud ee kaliya. Gali dakhliga(s) dollars oo dhan.
- Haddii aanay dakhli ka helin wax ilaha ah, calaamadee sanduuqa "Dakhli Ma Leh".

**Step 2:** Ku lifaaq caddeynta dakhliga qof kasta oo ka mid ah dadka waaweyn ee ku qoran.

- Caddeyn la aqbali karo waxaa ka mid ah foomka W-2 ee sannadkii hore, 30ka maalmood ee ugu dambeeyay (isku xiga) jeegag mushaar ee qof kasta oo dakhli helaya, bayaanka kaalmada maaliyadeed, ama warqad ka socota shaqaaleha oo ku qoran warqadda shirkadda.
  - Qoysasku waa inay soo gudbiyaan dukumentiyada ugu dambeeyay ee la heli karo.
  - Jeegaga mushaar waa inay taariikheysnaadaan lixda bilood ee abaalmarinta ka hor.
  - Haddii noocyada kale ee dukumentiyada aan la heli karin, dukumentiyada canshuuraha dakhliyada ee sannadkii hore ayaa la isticmaali karaa. Dukumentiyada canshuuraha waa inay noqdaan nuqul ka mid ah nooca la saxiixay ee loo gudbiyay Waaxda Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) ama ku jiraan ogeysiiska xaqiijinta haddii lagu gudbiyo koronto ahaan.
- Haddii qoyska aanu lahayn dakhli, mid ka mid ah dadka waaweyn ee qoyska waa inuu buuxiyaa Caddeynta Qoyska ee Aan Dakhliga Lahayn eeg bogga 8aad

### Ilaha Dakhliga ee Dadka Waaweyn

**Mushaharka Guud ee Shaqada**
- Mushahar, mushaarooyinka, gunnooyinka lacag caddaan ah (ka hor ka intaan wax laga jarin ama canshuuraha)
- Haddii aad ku jirto Ciidanka Milatariga Mareykanka:
  a. Mushaharka aasaasiga ah iyo gunnooyinka lacag caddaan ah (ha ku darin mushaharka dagaalka, FSSA ama lacagaha guryaha gaarka loo leeyahay)
  b. Lacagaha guryaha ka baxsan saldhigga, cuntada iyo dharka

**Iska leh Ganacsi ama Beer**
- Dakhliga saafiga ah ee ka soo gala iskii u shaqeysiinta (beerta ama ganacsiga)

**Lacagta Taakulaynta Carruurta, Nafaqada**
- Lacagta Taakulaynta Carruurta, Lacagta Nafaqada

**Dhammaan Dakhliyada Kale**
- Kaashka kale ee laga helo Dawladda Gobolka ama deegaanka (ha ku darin barnaamijyada Ikhtiyaarka 1 ee lagu taxay Bogga 9)
- Faa'iidooyinka shaqo la'aanta
- Magdhowga shaqaalaha
- Faa'iidooyinka duqeyda dagaalka
- Faa'iidooyinka shaqo joojinta
- Faa'iidooyinka Bulshada, faa'iidooyinka naafonimada
- Dakhliga joogtada ah ee laga helo amaah ama deeq
- Lacagta joogtada ah ee laga helo meel ka baxsan

## Dadka Waaweyn ee Qoyska iyo Dakhligooda

| Magacyada Dhammaan Xubnaha Waaweyn ee Qoyska (Magaca Hore iyo Magaca Dambe) | Mushaarka Guud ee Shaqada *Ha qorin mushaharka saacadlaha ah* | | | | | Ma Tahay Iskaa U Shaqeysi ama Beeraley? | | | Taakulaynta Carruurta, Nafaqada | | | | | Dhammaan Dakhliyada Kale | | | | | Daqli La'aan |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Liis garee dhammaan xubnaha waaweyn ee qoyska (adiga oo ku jira) xitaa haddii aanay dakhli helin. Ku dar carruurta si ku meel gaar ah uga maqan iskuulka ama jaamacadda. | Todobaad | 2 Todobaad | 2x Bisha | Bishii | Gali dakhligii ka hor **goynta ama canshuuraha** oo doollar buuxa | Bishii | Sanadkii | Dakhliga saafiga ah ee beeraleyda ama iskii u shaqeysiinta. Ha ku celin meel kale.) ($) | Todobaad | 2 Todobaad | 2x Bisha | Bishii | Lacagta La helay ($) | Todobaad | 2 Todobaad | 2x Bisha | Bishii | Hawlgab, naafonimo, shaqo la'aan, faa'iidooyink duqeyda, iwm. | Hubi haddii dadka waawey-ni aanu lahayn dakhli. |
| | O | O | O | O | | O | O | | O | O | O | O | | O | O | O | O | | O |
| | O | O | O | O | | O | O | | O | O | O | O | | O | O | O | O | | O |
| | O | O | O | O | | O | O | | O | O | O | O | | O | O | O | O | | O |

## Codsigaagu ama applicationka ma dhamaystrirn ilaa aad ka keento warqad dakhliga loo baahnayn.

Dakhli la'aan? Dadka qaangaarka ah ee ku nool guriga iyo dakhli soo geli bogga toddoba 7 waa in aad buuxisaa iyo sidoo kale Foomka ku dhawaaqida Qoyska ee Dakhli la'aan ama loo yaqaan "*Household of Declaration of No Income"* bogga 8.

**Soo gudbi** warqad gooni ah (s) muujinayso inaad u-qalmida dakhligaagu uu yaha mid ka mid ah oo loo baahnayah ku wan bogagga 6 & 7.

Tusaalooyinka guud ee loo gudbiyay Doorashada 1: Ka-qaybgalka Barnaamijyada Dadweynaha (bogga 6)

- ***Warqadda dugsiga oo sheegaysa in xubin qoyska ka mid ah uu helo Cunno bilaash ah iyo qiimo jaban***
- ***Warqad la fasaxay oo ka timid degmada oo ay ku qoran tahay magacaaga qaataha SNAP/MFIP/CCAP.***
- ***Qoraalka diiwaangelinta Head Start***

Tusaalooyinka guud ee loo gudbiyay Doorashada 2: U-qalmitaanka Dakhliga Qoyska (bogga 7)

- ***Jeeggii ugu dambeeya (isku xiga) 30 maalmood jeegaggii aad heshay***
- ***Sannadkii hore W2***
- ***Sannadkii hore canshuur***
- ***Bayaanka Lacag bixinta Masruufka Ilmaha***
- ***Bayaanada lacag bixinta SSI***

Haddii aad buuxi applicationka ama codsiga iyo aad rabto in laguu tixgeliyo sababtoo ah waxaad tahay waalid ka yar 21 sano oo weli ku jira dugsiga sar ama high skuul ama qaado GED program, Waxaan u baahanahay caddayn qoraal ah oo ku saabsan in aad tahay arday muujinaya warqadda ku qoran magacaaga iyo skuulka dhigto.

Nala soo xidhiidh haddii aadan hubin tilmaamahan ama noocyada dukumentiyada la aqbali karo.

651-641-6604
scholarships@thinksmall.org

Hubi inaad haysato wax kasta oo aad u baahan tahay ku saabsan codsigaaga ama applicationka inta aanad gudbin ka hor. Dib u noqo bogga afar4 ee Tilmaamaha si aad iska hubisa liiska.

**Buuxi** boggan haddii aanay jirin xubnaha waaweyn ee qoyskaaga oo leh dakhli.
**Ka bood boggan** haddii aad isticmaalayso barnaamij Ikhtiyaarka 1 ama haddii hal ama in ka badan oo ka mid ah dadka waaweyn ee qoyskaaga ay leeyihiin dakhli**.**

- Qoysaska aan dakhli lahayn weli waa inay liiska ku daraan dhammaan dadka waaweyn ee qoyska ku jira Bogga 7.
- Ha buuxin boggan haddii dakhli loo qoray hal ama in ka badan oo ka mid ah dadka waaweyn Bogga 7.
- Ha buuxin boggan haddii aad kaga jawaabtay "haa" su'aalaha 1-7 ee Bogga 6 oo aad soo gudbineyso caddeyn ka qaybgalka barnaamij dadweyne.

## Caddeynta Qoyska ee Aan Dakhli Lahayn

Qoraalka hoose wuxuu u adeegaa sida caddeyntaada ee aan dakhli lahayn ee qoyska ee Ikhtiyaarka 2. Foomkan waa inuu buuxiyaa isla waalidka ama ilaaliyaha sharciga ah ee saxiixa Codsiga Deeqaha Waxbarashada Hore – Wadada I..

**Aniga, ________________________________________________________, waxaan caddeynayaa inaan anaga oo ah qoys aan hadda haysan dakhli, maanta oo ah ___________________________.**

*Today's Date: MM/DD/YYYY*

**Saxiixa**:______________________________________________ **Taariikhda**:______________________________

*Signature Date: MM/DD/YYYY*

## Heshiiska u Hoggaansanaanta Shuruudaha

Saxiixida codsigan, waxaad ku xaqiijinaysaa inaad akhriday, fahamtay, oo aad ogolaatay shuruudaha Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hore iyo qodobada hoos ku xusan.

- Macluumaadka ku jira codsigan waa run, waxaana la soo sheegay dakhliyada dhammaan xubnaha qoyska. Haddii aan si ula kac ah u bixiyo macluumaad been ah, ilmahaygu wuxuu lumin karaa deeqda, waxaana laga yaabaa inaan u baahan doono inaan dib u soo celiyo lacagtii horey loo bixiyay ee gobolka.
- **Ilmahayga 3 ilaa 5 jirka ah,** waa inuu dhameystiro Baaritaanka Carruurnimada Hore 90 maalmood gudaheeda ee kalandarka ka dib marka uu ka qaybgalo barnaamijka la doortay isagoo isticmaalaya deeq. Haddii ilmahayga uu helo deeq inta u dhaxeysa da'da 0 iyo 2, waa inuu dhameystiraa baaritaanka 90 maalmood gudaheeda ee dhalashadiisa saddexaad ah.
- Ilmahaygu wuxuu u qalma doonaa inuu helo deeq ilaa Ogoosto 31 ee sanadka ee u qalmo inuu galo xannaanada, ama marka uu 5 sano jir gaaro Sebtembar 1, inta lacagaha gobolka la heli karo.
- Waxaan ogeysiin doonaa Maamulaha Aagga marka ilmahaygu joojiyo ka qaybgalka barnaamijka aan isticmaaleyno deeqda.
- Waxaan ogeysiin doonaa Maamulaha Aagga haddii aan guuro ama macluumaadka xiriirka aan beddelo.
- Saddex bilood Gudaheeda dib markii la siiyay Deeq Waxbarashada Hore, ilmaha(yaasha) waa inuu ka diiwaan gashan yahay barnaamijka Parent Aware ama deeqda waa la tirtiri doonaa. Haddii loo baahdo, Maamulaha Aagga ayaa i caawin doona inaan la xiriiro Child Care Aware si ay iiga caawiyaan helitaanka barnaamijyada ku yaal aagga aan degganahay. Deeqda waxaa la joojin karaa haddii aanan la xiriirin Maamulaha Aagga ee ku saabsan isticmaalka qorshahayga deeqda.
- Xaadirnta joogtada ah iyo ka qeybqaadashada ayaa la filayaa. Deeqaha Waxbarashada Hore ma bixinayaan in ka badan 25 maalmood oo maqnaansho ah, 10 maalmood oo loo qorsheeyay xiritaanka iyo 11 maalmood oo fasaxa barnaamijka ah. Maalmo maqnaansho oo ka badan 25 lama dabooli doono deeqaha waana in aan ka bixiyo kharashkeyga haddii aanay jirin ka-dhaafid rasmi ah oo loo fidiyay ilmahayga.
- Haddii barnaamijku aanu ka qaybqaadan Parent Aware, laga yaabaa inaanan awoodin inaan sii wado isticmaalka Deeq Waxbarashada Hore ee barnaamijkaas.
- Haddii aan ahay bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee ka qaybqaadanaya Parent Aware, waxaan fahamsanahay inaanan awoodin inaan isticmaalo Deeq Waxbarashada Hore ee ilmahayga ee daryeelka qoyska ee aan sharciyaysan

### Oggolaanshaha Loo Baahan Yahay ee La Wadaagidda Macluumaadkaaga

Waa inaad oggolaato dhammaan bayaannada soo socda si aad uga qaybqaadato barnaamijka deeqda..

- Maamulaha Aagga wuxuu la wadaagi karaa magaca ilmahayga/ilmaha, cinwaanka, taariikhda dhalashada iyo jinsiga, iyo magaca iyo cinwaanka aan ku qoray codsiga, iyo sidoo kale xadiga deeqda ilmahayga uu u qalmo iyo taariikhda abaalmarinta, barnaamijka aan doorto. Tani waxaa loo baahan yahay si loo hubiyo saxnaanta u dhaxeysa codsiga iyo Heshiiska Qorsheynta Abaalmarinta iyo macluumaadka uu hayo barnaamijka.
- Maamulaha Aagga wuxuu la wadaagi karaa magaca ilmahayga/ilmaha, cinwaanka, taariikhda dhalashada iyo jinsiga, iyo magaca iyo cinwaanka aan ku qoray codsiga la: (1) degmada iskuulka degaankayga, ujeedada ah in ilmahayga loo qoondeeyo lambarka Aqoonsiga Ardayga ee Degaanka (SSID) si loo isticmaalo Maamulka Deeqda/Maamulka Aagga, iyo (2) Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE) si loo aqoonsado ilmahayga loona xaqiijiyo lacagaha deeqda.
- Gobolka Minnesota wuxuu la wadaagi karaa macluumaadkayga iyo xaq u yeelashada ilmahayga/ilmahayga iyo isticmaalka deeqaha hay'adaha kale ee dawladaha iyo barnaamijyada ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xaddidnayn: Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP), shaqaalaha wakaalada bulshada ee degmada ama qabiilka, MFIP, SNAP, Head Start, cuntada lacag la'aanta ah iyo qiimaha la dhimay (FRPM), iyo Barnaamijka Cuntada Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CACFP). Hay'adahani sidoo kale waxay wadaagi karaan macluumaadka xaq u yeelashada iyo isticmaalka kaalmada ee aniga iyo ilmahayga ee Gobolka Minnesota. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali karaa in lagu xaqiijiyo u-qalmitaanka dakhliga qoyska iyo in lagu

kormeero isticmaalka deeqaha iyo barnaamijyada kale ee kaalmada dadweynaha. Waxaan fahamsanahay in oggolaanshaha la wadaagida macluumaadkayga ay sii jiri jirto lix bilood ka dib marka deeqdaydu dhammaato.

- Maamulayaasha Aagga waxay wadaagi karaan macluumaadka codsigan ee Gobolka Minnesota oo ay ku jiraan magacayga iyo cinwaankayga; macluumaadka dadyowga; waxbarashada waalidka; macluumaadka dakhliga; xaq u yeelashada ilmahayga iyo xadiga Deeq Waxbarashada Hore; barnaamijka aan isticmaalo deeqda; lambarka SSID ilmahayga; iyo haddii aan buuxiyay shuruudaha barnaamijka ama maya. Macluumaadkan waxaa loo baahan yahay in dib loogu eego u-qalmitaanka, hirgelinta barnaamijka, waxaana lagama maarmaan u ah u hoggaansanaanta sharciga gobolka ee awood u siinaya barnaamijka.
- Si loo xaqiijiyo in baaritaanka carruurnimada hore la sameeyay, Maamulaha Aagga wuxuu leeyahay oggolaanshaha aan siiyay oo ah inuu la xiriiriyo xafiiska degmada iskuulka ilmahayga si loo xaqiijiyo goobta iyo taariikhda baaritaanka.

**Ogow** *Maahan inaan oggolaado la wadaagida macluumaadkayga, laakiin haddii aan doorbido inaanan oggolaansho siinin, waxaan fahamsanahay in ilmahayga/ilmahaygu aanu u qalmin inuu helo Deeqda Waxbarashada Hore. Macluumaadka la sii daayo kuma jiraan dukumentiyada taageeraya ee lagu lifaaqay codsigan.*

## Digniinta Tennessen ee Gobolka Minnesota

Ogeysiiskani wuxuu khuseeyaa dhammaan macluumaadka laga uruuriyo barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hore. Waxay sharxaysaa macluumaadka aan uruurin doono iyo sababta aan u uruurinayno..

**Waa maxay macluumaadka aan kaa codsaneyno?** Waxaan kaaga codsaneynaa dhammaan macluumaadka ku jira codsiga barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hore – Wadada I, qaar ka mid ah oo loo arko xog gaar ah oo hoos timaada sharciga Minnesota.

**Maxaynu ku waydiinaynaa macluumaadkan?**
Macluumaadka ku jira codsigan waxaa loo baahan yahay si loo codsado Deeq Waxbarashada Hore. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadka halkan lagu uruuriyay, iyo macluumaad kasta oo dheeraad ah oo la xiriira, si loo go'aamiyo u-qalmitaanka maalgelinta. Macluumaadkan waxaa loo baahan yahay si loo hoggaansamo sharciga gobolka ee awood u siinaya barnaamijka.

**Ma ku qasban tahay inaad bixiso xogtan?**
Ma jirto waajib sharci oo kugu saabsan inaad bixiso xogta la codsaday; si kastaba ha ahaatee, la'aanteed, ma go'aamin karno xaq u yeelashada ilmahaaga mana heli doono deeqda.

**Yaa kale ee arki kara macluumaadkan?**
Sida lagu sharxay meelaha kale ee codsiga, oggolaanshahaaga awgeed waxaan la wadaagi doonaa macluumaadkaaga barnaamijka aad doorato, degmada iskuulkaaga degaanka, iyo Gobolka Minnesota. Haddii aad bixiso oggolaanshaha ikhtiyaariga ah, hay'ad saddexaad ayaa isticmaali doonta macluumaadkaaga marka la qiimeynayo waxtarka barnaamijka deeqda ee gobolka. Dhammaan hay'adahan, oo ay ku jiraan qiimeeyaha, waxaa ku waajib ah shuruucda dhaqamada xogta Minnesota iyo shuruucda gaarka ah mana wadaagi doonaan xogtaada gaarka ah ee loo yaqaan sida lagu sharaxay halkan iyo oggolaanshaha. Qiimeeyaha waa inaanu la wadaagin xogtaada cid kale marka laga reebo Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hore ee Gobolka Minnesota. Waxaan sidoo kale siin karnaa xogta aad bixisay Kormeeraha Sharci-dejinta, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota, iyo/ama hay'adaha kale ee leh awood sharci oo lagu heli karo macluumaadka, ama cid kasta oo ay maxkamad amartay.

**Macluumaadkan sida kale loogu isticmaali karaa?**
Waxaan isticmaali karnaa ama sii deyn karnaa macluumaadkan oo kaliya sida lagu sheegay ogeysiiskan, ilaa aad siiso oggolaansho qoran si loogu sii daayo macluumaadka ujeeddo kale ama qof kale ama hay'ad kale. Macluumaadka waxaa

loo isticmaali karaa ujeedo kale haddii Congress-ka Mareykanka ama Golaha Sharci-dejinta ee Minnesota ay soo saaraan sharci oggolaanaya ama u baahanaya isticmaalka kale.

**Mudo intee le'eg ayaa xogtayda la hayn doonaa?**
Xogtaada waxaa la hayn doonaa ugu yaraan toddoba sano.

# Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha Sharciga ah

## Oggolaanshaha Ikhtiyaariga ah: Sii Daynta Macluumaadka iyo Ka Qaybgalka Qiimeynta

Fadlan ku sawir si aad u xaqiijiso inaad akhriday, fahantay oo aad oggoshahay kuwan soo socda..

_____Maamulaha Aagga ama Gobolka Minnesota waxay wadaagi karaan macluumaadka codsigayga, xaq u yeelashada ilmahayga iyo xadiga Deeq Waxbarashada Hore, iyo barnaamijka aan deeqda isticmaalo, iyadoo barnaamijyada qiimeynta ee Gobolka Minnesota la oggolaaday ujeedada ah in la falanqeeyo sida lacagaha loo isticmaalo, sida qoysaska looga wargaliyo barnaamijka, saameynta barnaamijka ee horumarka ilmaha ama u diyaar garowga iskuulka, tayada barnaamijyada waxbarashada hore ee deeqaha lagu isticmaalo, iyo qiimeyn kale oo ku habboon oo ay qaddariso Gobolka Minnesota. Warbixin dadweyne oo aan ku jirin macluumaad gaar ah oo lagu aqoonsan karo qof kasta oo ilmaha ka mid ah lama daabici doono..

Adiga oo hoos ku saxiixaya, waxaad ogolaatay oo aad xaqiijisay dhammaan qodobadan soo socda:

1. Waxaan xaqiijinayaa inaan ahay waalidka ama ilaaliyaha sharciga ah, dhammaan macluumaadka ku jira codsigan waa run, waxaana la soo sheegay dakhliyada dhammaan xubnaha waaweyn ee qoyska. Waxaan fahamsanahay in haddii macluumaad been ah la bixiyo, ilmahayga/ilmahaygu wuxuu lumin karaa deeqda waxaana laga yaabaa inaan u baahan doono inaan soo celiyo lacagtii horey loogu bixiyay gobolka.
2. Waxaan oggolahay shuruudaha barnaamijka ee lagu sharxay bogga Heshiiska u Hoggaansanaanta Shuruudaha.
3. Waxaan oggolahay in la wadaago macluumaadka aniga iyo/ama ilmahayga sida lagu sharxay Oggolaanshaha Loo Baahan Yahay ee La Wadaagidda Macluumaadkaaga.
4. Waxaan oggolahay inaan akhriyay oo aan fahmay Digniinta Tennessen.

## Saxiixa Waalidka ama Ilaaliyaha Sharciga ah

Ku Saxiix qalin qad Madow//buluug leh ama elektaroonig ahaan, maaha qalin.

* Magaca Sharci ee Waalidka/Ilaaliyaha:____________________________________________________________

*Magaca Hore* *Magaca Dhexe* *Magaca Dambe*

*Saxiixa:_____________________________________________ *Taariikhda:___________________________

*Taariikhda la saxiixay: MM/DD/YYYY*

# Gudbi/Dir Codsigaaga

Usoo gudbi/udir codsigaaga oo dhameystiran iyo dukumentiyada u-qalmitaanka Maamulahaaga Aagga:

think small
LEADERS IN EARLY LEARNING

Think Small
ATTN: Early Learning Scholarships
10 Yorkton Court
Saint Paul, MN 55117
Email: ApplyELS@thinksmall.org
Phone: 651-641-6604